

Ogaanshaha Xafidaada Xogta 2019-2020 ee Dugsiyada Dadweynaha Saint Paul

Gobolka Minnesota wuxuu kharash ku bixiyaa barnaamijka Flipside ee Iskuulka ka-dib ee ka baxa Dugsiyada dadweynaha Saint Paul si ay ardayda dugsiyada dhexe u helaan taageero dhinaca waxbarashada ah. Barnaamijka Flipside waxaa lagu diiwaan-galiyaa macluumaadka ardayda ka qaybgasha barnaamijkan si (1) loola socdo macluumaadka ka-qayb-galaha iyo habka uu uga qaybgalayo, iyo (2) si qiimayn loogu sameeyo waxtarka barnaamijka, oo ay ka mid tahay saamaynta uu barnaamijku ku yeelanayo xirfadaha dhinaca bulshada ah ama waxbarashada e ardayga. Uruurinta macluumaadkani waxay noo sahlaysaa inaan ogaanno korna u qaadno tayada barnaamijkan taageera dhallinyarada iyo qoysaska Minnesota.

Maxay yihiin macluumaadka la aruurinayo ee la diwaangalinayo?

- Macluumaadkan waxaa ka mid ah, lambarka ardayga, magaciisa, fasalkiisa, dhalashadiisa, iskuulkiisa, qowmiyaddiisa
- Xogta ku saabsan ka qayb-galka barnaamijka sida maalmaha ardaygu ka qayb galo barnaamijka
- Jawaabihii ay ardaydu ku soo gudbiyeen ra'yi-uruurinta (Student responses to the Survey of Academic and Youth Outcomes (SAYO)), kuwaas oo ay ka mid ahaayeen su'aalo ku saabsan waxyaabaha uu ardaygu kala kulmay ka qaybgalka barnaamijka iskuulka kaddib ah ama kan xagaga. Ardaydu waxay helayaan fursad ay ku diidi karaan ka qaybqaadshada ra'yi-uruurintan haddii ay rabaan. Waxaad ra'yi-uruurinta ka akhrin kartaa www.spps.org/flipside.

Yaa arki kara macluumaadka shakhsiga ee la aruuriyay si cilmi-baaris loo sameeyo?

- Helidda macluumaadka gaarka ah sida (lambarka ardayga, magaciisa, fasalkiisa, dhalashadiisa, iskuulkiisa, qowmiyaddiisa iyo barnaamijka u ka qaybqaato) ee ilmahaaga ku saabsan si aad ah ayaa loo ilaaliyaa si aysan u galin gacanta dad aan loogu talagalay. Dadka ama hay'adaha laga yaabo inay arki karaan macluumaadkan waxaa ka mid ah:
- Shaqaalaha Dugsiyada Dadweynaha Saint Paul ee ka shaqaynaya barnaamijka Flipside.

Shaqaalaha hay'adaha ilmahaaga siiya fursadaha iyo hawlaha waxbarashada ka baxsan. Hay'adahan waxaa ka mid ah **Augsburg College, Interfaith Action, JK Movement, Keane Sense of Rhythm, Saint Paul Parks and Recreation, Saint Paul Public Library, Saint Paul Urban Debate, Sanneh Foundation, Science Museum of Minnesota, St. Olaf College, University of Minnesota Urban 4-H, Voyageur Outward Bound.**

-
- Shaqaalaha kormeerka/xisaabaha kuwaas oo xaq u leh inay eegaan shaqada Dugsiyada Dadweynaha Saint Paul
- Shirkadaha Thomaskelly Software Associates, LP and CitySpan Technologies, kuwan oo bixiyay nidaamka/habka lagula soconayay xogta iyo ka-qaybgalka barnaamijka Flipside.
- Waaxda Waxbarashada ee Minnesota, Johnstad & Associates iyo Wilder Research, kuwan oo macluumaadkan u isticmaali doona inay daraasado ka sameeyaan kaddibna ay warbixin ka soo qoraan. **Macluumaadka gaarka ah (ee lagugu aqoonsan karo) marnaba laguma soo darayo daraasaddan ama warbixintan.**
- Waaxda Waxbarashada ee Minnesota oo mar walba la socota xogta waxbarashada iyo macluumaadka ee ardayda.
- Sidoo kale, waxaa laga yaabaa inay dad kale arki karaan macluumaadka haddii uu sharcigu sidaa oggolaado, sida amar maxkamadeed.
- **Maxay tahay xuquuqdaada ku aaddan xogta la aruuriyay ee barnaamijka Flipside?**
- Waxaad xaq u leedahay inaad hesho nuqul ku saabsan macluumaadka ay ay SPPS ka hayaan ilmahaaga.
- Waxaad xaq u leedahay inaad saxdo wax kasta oo ka qaldan macluumaadka ilmahaaga.
- Haddii aad dareento in lagu xad-gudbay xuquuqda shakhsiyadeed ee ilmahaaga, waxaad xaq u leedahay inaad cabasho u soo gudbiso hay'addan ama Waaxda Waxbarashada ee Minnesota ood kala xiriiri karto (Data Practices Compliance Officer, Minnesota Department of Education, 1500 Highway 36 West, Roseville, MN 55113).

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo www.spps.org/flipside